Halgan Daahir

UDUDSI

SI HAWEENKA AAN WAX CURIN AY ISAGA DHEX ARKAAN SUUGAANTEENNA





UDUDSI

Si haweenka aan wax curin ay isaga dhex arkaan suugaanteenna

Visionary Press

Halgan Daahir

UDUDSI

Si haweenka aan wax curin ay isaga dhex arkaan suugaanteenna

Visionary Press



© Halgan Daahir, 2026

Visionary Press waxa ay u daabacdaa buugta waxgalka ah ee turjuman ama dhaladka ah habka loo yaqaan EBook, ama habka iliktoroonigga ah. Sida oo kalena waxa ay cusboonaysiisaa buugaagta maanka u furaya dhallinyarada iyo guud ahaan bulshada Soomaaliyeed. Buugta ay Visonary Press soosaarto waxaa loo heli karayaa qaab dhijital ah.

Xuquuqda qoraalkan waxa ay u dhawrsan tahay: Halgan Daahir
Nashqadaynta jaldiga iyo qaabaynta habmuuqa buugga: Visionary Press

Visionary Press is a non-profit organization dedicated to transforming traditional papers into accessible and engaging eBooks. Our mission is to harness the power of technology to preserve and disseminate knowledge, making it available to a broader audience.

For more information contact with us: Visionarypress76@gmail.com
Cover and design by: Visionary Press

ERAYGA MADBACADDA

VISIONARY PRESS waa madbacad dhijital ah, oo aan macaashdoon ahayn. Go'aan shakhi ah ayaa la gu aasaasay, iyo ka dib markii la ga fursan waayay in ay jirto fursad ay ka faa'idaysan karaan dadka daneeya akhriska iyo qoraalka, se aanay u saamaxayn xaalad dhaqaale ama xeelad iyo tab.

Sida diraasad World Bank ay daabacday 2024 ay dhigayso: 46.3% dadka Soomaaliya ku nool waxba ma akhrin karaan, waxna ma qori karaan. Sidaas oo ay tahayna, ma muuqdaan dedaallo wax loo ga qabanyo masiibadaas iyo jahligaas xididaystay ee dhallinyarada iyo dalkaba mustaqbal tiray.

Waxaa ka sii daran boqollaydaas dadyow ee aan waxba akhrin karin waxna qori karin, doorka ay madbacadaha caadiga ahi ay ka ciyaarayaan marxaladdan. Inta uu yahay door aqoonayn iyo dhiirrigelin waxbarasho, waxaa ka badan inta uu yahay door ganacsi iyo faafreeb. Dakhliga yar ee uu masruufto ardayga Soomaaliga ahi, ama qofka dhallinyarada ah ee danaynaya in uu si uun aqoontiisa u kobciyo, ma goyn karaan buug la qiime ah ama ka badan masruufkooda billaha ah. Xitaa haddii ay gooyaan, buugaagta ay gadanayaan ma aha wax la gu doortay muhiimad ee waa wax faafreebban oo loo rabo in ay gudbiyaan uun hal aydhiyoolajiyad.

Sida oo kale, dhibaato aan taas ka dhicin ayaa haysata qoraaga ama tarjumaaga Soomaaliyeed. Wax kasta waxaa ka xiga lacag—haddii ay noqoto

tifaftiris, nashqadayn, quraarid iyo daabacis. Intaasi waa inta aasaaska u ah soosaarista buugga, se marka buuggu soo baxo waxaa u sii hadhsan maktabado macaashdoon ah, suuqgeyn iyo kulanno loo qabto buugga, oo sii kicinaya qiimaha buugga adkaynaysana in uu faafo oo la gato.

Intii uu qoraagu heli lahaa wax uu ku sii wato socdaalkiisa qoraannimo, beddelkeeda, dhiigbax-dhaqaale ayaa ka dilaya hammuuntii uu u qabay majaalkan. In kasta oo akhlaaqiyaadka aqoontu iyo xirfadda qoraannimadu ay farayso in marka horeba aadan macaash doonin ee figta aad hiigsanaysaa noqoto farriintaada oo baahda; haddana waa sida uu yidhi naaqidkii iyo afyaqaankii weynaa ee Saamuweel Joonsan: "Qof aan xiskiisu dhammayn, ayaa wax u qora bilaash."

In ay qoraanimadu manfaco ama faa'ido u yeelato qoraaga, waxaa ka horraysa in marka hore la helo aasaas dhisan, iyo jirtaan bulsho u diyaarsan meersiga afkaaro kaladuwan.

Visionary Press inta karaankeeda ah ayaa ay ka qaybqaadanaysaa dhisidda bulsho u furan afkaar kasta, iyo kobcinta akhriska iyo qoraalka. Visionary Press waxa ay u taagan tahay qabyatirka waxqabadyada waayay fursad daabacaad, iyo waxlaqabashada qoraayada la' meel ay aragtidooda mariyaan. Visionary Press waxa ay si taddawuc ah u ga caawinaysaa cid kasta oo qoraa mahiibsanaysa, si kastaba ha noqotee, in wax xoogaa tayo ah uu yeesho qoraalkeedu, oo uu noqdo wax la akhrisan karo. Sida oo kale, Visionary Press, waxa ay soo dhawaynaysaa qoraa kasta oo wax qiime leh la jecel dhallinyarada la' hab ay u dhisaan garaadkooda, iyo si alaale iyo hab ay u ga xoroobaan jahliga xaydaanbbadiisa.

VISIONARY BOARD TEAM

JANUARY 21, 2026

TUSMO

ERAYGA MADBACADDA **9**
Mahadnaq **14**
Gogoldhig **16**
HORDHAC **20**
SUUGAAN DUMARKA GAAR U AH **22**
MAANSADA: JAARIYAD 23
HEESTA LABAAD: 38
HEESTA AFRAAD: 39
HEESTA SHANAAD: 40
AABBUHU UBADKIISA MA U HEESI KARAA? 41
SUUGAAN KALGACAL **43**
Maansada: KALGACALKU WAA DIIN 44
MAANSADA: BOHOLYOW 46
MAANSADA: QOFBA SI 49
MAANSADA: QAYAYAAB 52
HEESTA: AMARRE 54
HEESTA: MAAD BAAJISEEN 56
HEESTA: RIYO 58
HEESTA: CARRADAA ILAAHAY 63
HEESTA: AXADDII HABAARNAYD 65
HEESTA: KU HABBOONIDAA 67
SUUGAAN NAF LAHADAL AH **71**
MAANSADA: SADAR 72
MAANSADA: DAMAQ 75
MAANSADA: HALGAN 77
SUUGAAN WADDANI AH **79**
HEESTA: WADDANKAYGIIYOOW 80
MAANSADA: ISKA SIDO! 82
MAANSADA: SAAXIIB 86

MAHADNAQ

Mahad oo dhan waxa leh, Maxamed Shariif iyo mabdacadda Visionary Press oo buuggan tifatiray, nashqadeeyay una asashay jeldigan sida u fog u xanbaaraya nuxurka buugga. Marka, xiga waxa mahad leh saaxiibaday Shacraawi Maxamuud, Maxamed Buux iyo Nuur Ileeye oo suugaanta ila dhildhilay. Waxa kale oo mahad leh, Sahra Rashiid oo buugga in aan qaybo u kala guro igu la talisay.

Waad mahadsantihiin,
dhammaantiin.

GOGOLDHIG

"UDUDSI" WAA MAGACA diiwaanka maanso ee Halgan Daahir. Waa ududsi iyo sookabasho. Waa amaamud iyo dibunoolaansho. Waa aragti cusub iyo dadnimasoorogaalcelin. Waa cod xorriyadeed iyo dab loo shiday dad is waayay. Cuntubyada diiwaanku waxay isa ga tallaabaan mawduucyada dumarka, carruurta, jacaylka, nafta iyo waddanka. Halgan baan ku leeyahay! Halgan, waxaa la gu gartaa dhiirranaanteeda ay ku dhaliisho xumaha nolosha hallaynaya, sidoo kalena ay ku tilmaanto samaha hagaajinaya. Waa summad ay ku caanbaxday halganka xaqudirirnimo, taas ka sokow waxaa fiiro leh habkeeda maansacurinta oo ah mid ay si sahlan u gu soohdo ereyo nuxur culus xanbaara. Waa hibo lagu lammaaniyay farsamo. Midhaha maansadeedu waa kuwa ka dabqaata aragtiyo iftiimin ah oo had iyo goor u taagan lahadalka maanka. Diiwaankani waa dhaxal ummadeed, waxsoosaar aqooneed iyo dugsi aragtiyeed. Waa waxqabad u wehelyeelaya dadka u taagan xorriyadda iyo samida nolosha. Waa anbaqaad cusub iyo qalab la gu furfuri karo seetooyinka dhaqameed ee ummaddu ka nuuxsan wayday. Waa tusmada dadnimada, caddaaladda, fayoobida iyo garashada.

Ammaan baan ku bogaadinayaa Halgan. Waa bilaabid la gu gaadhi karo han meel fog jira. Ma aha wax fudud in ay naag Soomaaliyeed jirrabto marin aan horteed la qaadin. Waxaan se hubaa in ay badheedhaheeda leedahay. Waxa aan ku biirin karaa waa un dhiirrigelin iyo in aan wax ka barto waayaheeda gobanimadoon. Halkan, waxaan ku soo gudbinayaa tusmada qodobbada diiwaanka, aniga oo mawduuc walba ka soo qaadanaya hal halqabsi:

Maansooyin dumar

Dhaqankii na ka la guray

Ragga gooni u la baxay
Garaaddada ku wada tolay
Ku gobeeyay raganimo
Dumarkana guhaadshee
Ku gumeeyay naagnimo
Ninka guul u haystiyo
Kuma gayo gafuurtaag.

Kuma gayo

Maansooyin carruureed

Hobeeya hobeey hobeeya
Horseed kaahaay hobeeya
Hanaan wacaneey hobeeya
Hiraay cilmi lagu hagaago
Markaad hanatee dalkaaga
Hagtaa lagu haybiyaaye
Ha daynin aqoonta, hooyo.

Heescarruureed

Maansooyin kalgacal

Qof daloollo badanoo
lintiisa dadayoo
Damqadoo qarsanayaa
Kalgacalka dayrshee

Kama daalo ruuxaan

Runtu diiqad galinayn!

Kalgacaylku waa diin

Maansooyin naflahadal

Hawsheeda dunidiyo

Hirdankeeda waayaha

Ha ka quusan noloshee

Halgan baan ku leeyahay!

Halgan

Maansooyin waddani

Waxaan ahay barbaar

Warba aan u hayn

Waxa dhacaya (00)

Wacaal kaa rabee

Waddankaygiiyoow!

Waddankaygiyow

Halgan baan ku leeyahay!

Nuur Ileeye

HORDHAC

SUUGAANTU, WAA IIDAANKA NOLOSHA. Waa biyaha aynu isaga daadajinno qadhaadhka waayaha iyo wehelka maalmaha adag. Ha se ahaatee, suugaanta labku curiyo si isku mid ah uga ma wada hadasho ragga iyo dumarka. Sababta oo ah, suugaanta labku, had iyo jeer, waa tu gudbisa dareenka iyo fikirka labka—oo aan u laabqaboojin karin hooyada ubadka la daalaadhacaysa, u doodi karin inanta la kufsaday, ka hadli karin gabadha qalbijabsan ee wacadkeedii laga baxay. Waa suugaan aan gabadha cod u ahayn, oo ciidan u ahayn. Maxaa yeelay, suugaanta dumarka la ma siin mudnaanta suugaanta labka la siiyay, la ma dhegaysan, la ma aruurin, loo mana arko arrin dadaalkaas mudan.

Suugaantu, waxay ay iidaanka afka ku tahay, sida ay farriinta dhiillada leh ee aynu tabinayno innoogu suugayso, ee mid la dhegaysan karo uga dhigto. Ka warran haddii suugaanta ay tahay in ay kuu hadasho oo kaa hadasho—aad iska dhex waydo? Ka warran haddii dhakhtarkii aad dawada u doonatay ku dhaho "xanuunkaagu waa ceeb ee naga qarso"?

Suugaanta Soomaalidu waa caynkaa, damaqa naagtu waa ka CEEB aan laga hadal. Waxa gabadha dila, waxa qalbigeeda burburiya, dulmiga ay la kulanto, xanuunka ay qarsato, iyo, murugada ay ku kaliyowdo ka ma weheshan karto suugeenteeda. Waayo, suugaanteedu waxay ku hadashaa afka ninka, waxay ka hadashaa dareenka ninka, waxay ku fakartaa caqliga ninka, waxay ku heesta erayada ninka—xitaa haddii gabadhi qaaddo.

Waayaha nololeed ee adag ee gabadha sida: dilka, kufsiga, guurka qasabka ah, la guursiga, furriinka, ubadka ay kali koriso, gudniinka, carmalnimada la ceebsado, xaydka, quudhsiga jiraalkooda la quudhsado, hawsha guriga ee ay ku oofajabto, ubadka laga qaato, shaqooyinka ay qabtaan ee dhibka badan iyo, marxaladdaha nololeed ee ay maraan waxba laga ma curiyo, iyagana laga ma dhegaysto. Marka kaliya ee suugaanteennu gabadha xasuusataa waa marka ninku jeclaado, naco, la dardaarmo, u damqado ama u duceeyo.

Buuggan, UDUDSI, ee aan ku aruuriyay suugaantayada, waxa uu yabyabayaa suugaan ay dhif tahay in la maqlo codka qayb dhan oo umadda Soomaaliyeed ka mid ah. Waxa uu tebinayaa dareen ku filiqsan laabaha haweenka. Waxa aan rabaa in uu bar bilow u noqdo in haweenku iska hadlo oo isu hadlo, in haweenku dareenkooda sheegto ee aan loo sheegin, in haweenku fikirkooda iyo waayahooda wax ka curiyo, si haweenka aan wax curin ay isaga dhex arkaan suugaanteenna. Waxaan rabaa in aynu jarno dareenka ceebaalka ah ee lagu lammaanaysiiyo dareen cabbirrada haweenka. Wuxuu ka kooban yahay buuggu afar qaybood; suugaan haweenka gaar u ah, suugaan naf-la-hadal ah, suugaan kalgacal ah, iyo suugaan waddani ah. Suugaanta haweenku, waa qaybta kali ah ee Hordhac gaar ah leh.

SUUGAAN DUMARKA GAAR U AH

MARKA AAD KU FAKARAYSO af erayo gaar ah adeegsigooda laguu oggal yahay, oo aan lagaa filayn wax ka weyn: ii keen, ii dhaq iyo ii kari. Marka damaqaaga la qariyo, dareenkaaga la ceebsado ee garashadaadda la yaso. Marka suugaanyahankaaga la dhegaysto kolka ay guulwadaynayso ama, ay jabhad la socota ee guubaabadeeda la rabo, ee aan warka laga gurin kolka ay waayahaaga ka warramayso. Marka aad halabuur ka tahay duni lagaa ga yaqaano wax ka yar qof, maxay tahay in aad wax ka curiso?

Gurigaaga marka uu yahay goob aad joogi karto inta aad u shaqaynso si qancisa ninka leh, waalidkaagu marka uu kaaga eexdo walaalahaaga wiilisha ah. Dawladaaddu marka ay ku tidhaado "miyaanad NAAG ahayn, maxaad rabtaa?" Wadaadkaagu marku uu ku yidhaahdo, "ma cid baa ku aasta, maxaa kaa maqan?" Marka jiraalkaagu yahay dabar nolosha kaaga xidhan, maxay tahay in aad ka hadasho? Runtii, nolosheennu waa balanbal biiray, waxayna tahay in suugaantu innoo noqoto madal aynu ku soo bandhigno balanbalkaas. Dumarku, sida ay ragga ugu duruufo duwan yihiin in ay uga suugaan duwanaadaan ayay tahay, waa in aynu dibnaha barnaa sidii ay damaqeenna uga gabyi lahaayeen.

Cutubkan, haween baynnu u hadli, ka hadli oo ka hadashiin. Waxaan isku dayayaa in aan daaha ka qaado caloolyowga aynu qarsanno, in aan tilmaamnno sida ay shishe innoogu dhaawacdo erayada sahaalo loo dhaho. Wixii aan wax laga odhan baynnu wax iska odhan, maxaa yeelay, shaqada halabuurku waa in uu waayaheenna hab cusub waxa uga dhaho.

MAANSADA: JAARIYAD

Hablahaa gayiga
Ku guhaad qaboo
Goor iyo ayaan
Waxa lagu ganaa
Warmo goynayoo
Inta godob qarsoon
Haddaan gaar u faqo
Cirkaa guuxi lahaa
Illin gaaxatoo
Gowdiyo sanqadha
Gu' la moodayee
Igadaa gujada
Gacal baan nahee,

Gefku wuu dhacaa
Lagu kala go'ee
Gardarrada adoon
Guudka saaranayn
Waan gudoomayaa
Khaladkaan galee
Hay goyn wadnaha,

Wacadkaad gashoo
Garab kaa helaa
Gobbanimadu tahay
Markay garsho tee
Guurkaan lahaa
Gogal baan u dhigi
Markan gees ka maray
Qalbi ii godladay
Godobtaan ka galay
Anba way gubtaa!

Hayeeshee guraca
Nolol guuna baa
Gadgadoonka lee
Waayaha gorfee
Nafta goonideed
Markan gaar u idhi;
Maan gaydhamoo
Godladdaa i yidhi;
Gurbood iyo carruur
Gurgurcoodka iman
Intuu gaajo arag
Ama ruux gunnoo
Gumaystoo hagrada
Wakhtiguba u gayn
Gayi nabada iyo
Gaban ladan u doon!

Aan gaabiyoo
Kuu guud maree

Wax aan Garaad
U gollaynayaa;

Gabadh baan ahaa
Gasiinkay cuntiyo
Guri loo hoydiyo
Garba-saarta iyo
Gashigiyo maryaha
Ciddi gacan ka siin,

Khayrkay guclaha
Aqoon loo guntado
Markay goobayeen
Gaban reer dhalaan
Gijada ugu jiray,

Feedhahayga godan
Iyaggaa guroo
Garbahaan ku sidday
Gabannaan i leeg,

Jaarriyad giriif
Gacan-saar ku xigo
Looggu goodiyoo
Gabataan ahaa,

Gigi-waaqsilaa
Qof ka goohayoo
Gacalkuu xigsaday

Gudmaha u sitoo
Labadiisa garab
Midi goynayoo
Geerida ku suga
Gurigaan ahaa,

Xaquu gaar u laa
Ruux laga gudboo
Gabadhnimo darteed
Loo gumaynayoo
Xigto maanku gudhay
U gashaan ahaa,

Waxa godobta iyo
Guhaadaan qabiyo
Gardarrada i baday,

Anigoo gu' jira
Ayay goor madow
Aabbahay gacale
Denbi aanu gelin
Godob loogu dilay,

Ganni hooyaday
Galab awr maqnaa
Gacan noo dhawaa
Jeeddaado guud
Yara gaadh lahayd,

Gaangaanbi uu
Sid u go'ay lahaa
Yay u gaabisoo
Iyaddoon Gahaydh
Gurgurshaagi helin
Gabal baa u dhacay,

Caddaa lagu gudaa
La gargaarsadaa
Gudcur soo galoo
Guban kugu helee
Daruuraha is galay
Ayaa gibil ku xidhay
Dayixii gayiga
Gaadhsiin lahaa
Ilays kala guroo
Geedkiyo dadkaba
Aad ku garan lahayd,

Mar ay goob maddow
Go'a dhigatayoo
Wakhtigoo is guray
Salaad gudubtay ay
Ka gaadhsii lahayd
Ayaa balo gudoo
Guuraynaysaa
Gab ku soo dhaheen,

Ragga qaar gunnoo
Gocoraa jiree

Labo geel jiroo
Gacantoodu abid
Haween gaadhinbaa
Sidii gaaf aroos
Midba goor u baxay,

Cadka hoos u go'ay
Lugta gooni taal
Dhiiga ciidda goday
Gumaarkiyo wadnaha
Aan garaaca dayn
Gariirka is qabsaday
Galiilyadda xubnaha

Taah geeriyaad
Ilmo gabax ka tidhi
Guux laga naxiyo
Gool soo ciddiyo
Gudcur baa ku helay
Gabaahiir cidlaa,

Galin iyo badh bay
Meel aan geed lahayn
Sida goray bakhtiyey
Gaadadda u taal,

Indhahoo gudhoo
Gal cas yeeshay iyo
Xubnahoo gubtoo

Go'bo dhiiga lahayn
Ehel goobayaa
Barqo gaaban helay,

Qoyskaa galbaday
Godka in aan la galo
Ayaan goosan laa
Haddii layga guro
Taladaan guntee;
Garanwaa ka hadhay
Reer guurayoo
La guhaaddiyoo
Cidna gacalo tabin
Nasiib ii gartaa
Igu giijay xadhig.

MAANSADA: KUMA GAYO

Dhaqankii gumaysiga
Naagaha u gaarkaa
Galadiisu haydee
Marka gabadh sagaal jira
Guudcaddaale loo xidho
Ama gaari hiigsi leh
Gayaankeedu jecelyahay
Loo bixiyo godobreeb
Guubaabin jirayee
Garashada saboolkaa
Gorafkeeda laga helay,

Kuwii gabadha aasiyo
Kuwa geela dhaafsada
Isku garasho weeyee
Dhaqankii shan guursiga
Gobannimadu haydee
Marka gabadhi oydaba
Galadaha hantiyi jiray,

Dhaqankii na kala guray
Ragga gooni ula baxay
Garaaddada ku wada tolay
Ku gobeeyay ragganimo
Dumarkana guhaadshee
Ku gumeeyay naagnimo
Ninka guul u haystiyo
Kuma gayo Gafuurtaag,

Jahligii gammuuree
Xididkiisa guunkaa
Godobeeyay maankee
Naga dhigay gadaalsocod
Ninka guul u haystiyo
Kuma gayo Gafuurtaag,

Kaligii nin geesi ah
Kaligii nin goletage
Kaligii nin garasho leh

Kaligii nin gobannimo
Guudkiisa saartoo
Isu tolay garaaddada
Garbahiisa qubanoo
Qabku jooga gawsaha
Kuma gayo e yuu odhan
Gacalkaygi baad tahay

Gayiga iyo dhulkaagii
Ninka gacan-maroorsiga

Taladii ku gooyee
Kugu yidhi garaad baan
Gabadhyahay ku dheerahay;
Inuu been guddoonsaday
Ha garawsho qaatee
yuu garaabis kaa helin

Geeraarro liita iyo
Suugaanta godobeed
Markay gole ka mariyaan

Ruux gabay ku liicle ah
Markay quudhsi gabadheed
Sacab ugu garaacaan
Gardarrada u hiishaan

Marka ay gefkoodii
Giddigood ku faanan
Waligaa gardhigashada
Yaan ka gaabso lagu odhan!

Waxaad gaar u leedahay
Inta goonni kaa maqan
Inta guud badhkaagii
Giddigood adiga oon helin
Kaa laalan gobannimo,

Dhulka ginnida taalla iyo
Fursadduu ku gaadhee
Isu goonni yeelli iyo,
Gayigaad la leeddee
Yaan gasiin lagaa siin

Inta goosan kaa maqan!

GABAY:

MAR AAN KAMARUUN TAGAY 2024-kii, waxa layga sheekeeyay sheeko aad iigu dhegtay. Gabadh Talyaaniga joogtay oo dacwad u wadday qolo aannu wadda degganayn ayay ku dhacday. Iyada oo yar ayay guursatay, labo hablood iyada oo haysata ayuu odaygeedi dhintay. Markii odaygi dhintay ayaa walaalkii damcay in uu dumaalo, arrintaasi aad bay u dhibtay oo way diidday. Reerkii diidmadaa way qaadan kari waayeen oo waxay isku xidheen labo arrin: haddii aad rabto in aad hablahaaga haysato, waa in aad aqbashaa dumaalidda seeddigaa, haddii kale, hablaha innagu soo wareeji! Ta danbe ayay noqotay oo hablihii waa laga qaatay, markaas bay dalka isaga baxday oo tahriib ku gashay Talyaaniga, carruur denbe ma dhallin oo maba guursan!

Qiso aan taa ka fogayn ayaa hooyaday ku dhacday, markii ay aabbahay kala tageen—qiyaastii labaatan sanno ka hor. Waxaan xasuusataa iyada oo midkaayaba guri ku qarisay oo na la doondoonayo! Sababta na loo doondoonayay waxay ahayd: in reero miyi deggan na loo qaybiyo si aannu ciidan ugu noqonno. Afar nagga mid ah ayaa subax sidii adhi laga dareersaday! Si dhib badan ayay hooyo ku soo aruusatay afartii laga qaaday oo aan ka mid ahaa—labo sanno ka dib, labada wiil waaba lagu la dagaalamay (garo oo shan qof baanu nahay). Hooyaday dib uma guursan, markii ay aabbahay kala tageenna dhawr iyo labaatan jir bay ahayd! Hooyaday isma dhiibin oo korintayada ayay ku aayaseegtay, waxa se badan haween xal kale waayay oo ka quustay aragtida ubadkooda. Gabaygan koobani waxa uu tilmaamayaa sida haween badani uga tashadeen ubadkooda markii loo garaabi waayay:

Gayigayga walax baan ka ahay gini la siistaaye
Gabadhnimada waxay moodayaan gumaro xoolaade
Garashada dadkaygaa i tidhi 'geedxun baad tahaye'

Mar haddaan garawshiiyo jirin gacal i taageera
Mar haddaan gudmaha lay ogayn gooyay hilibkayga
In aan gaar u baxo bay naftani guul ka dayaysaaye
Bal guddoonso adigaa i dhigay gubadka aan aalle,

Gardarrada adaa hiil ku hela garab ku taageera
Galladdayda adigaa ka jecel waran ku googooya
Markaan ciil la goohaba adaa farax la geeraara
Galabtay u daran tahay adaa gooya wacadkeenna,

Guubaabadaydiyo intaan nolol la goobaayo
Guclihiyo intaan hawl u maro gool la dhalintiisa
Markuu gaadho heerkuu rabuu guursi badiyaaye
Gawsaha ma dhaafaan waxaan talo ku goynaaye!

Hadba goor la midablow intaan kuu gef qarinaayey
Adaa gubay naftaydoo i baday gaydha aan qabo e
Gurgurcoodka waxan uga tashaday godobihiinniiye
Gunnimada miyuu yeelayaa ruux garaad badani?

HEES CARRUUREED

DHAQANKA WAXAA ABUURA baahida ay bulshadu u qabto hab cusub oo ay ku waajahdo waayaha ku gadaaman. Soomaalidii hore waxay la ahayd in raggu dumarka ka mudan yahay, maadaama ninku qabto waxa ninku ka rabo in uu qabto ama ninku qiimeeyo. Maxaa yeelay, ninka Soomaaliga ahi, wuxuu waligiiba bakhtiin jiray ama sii holcin jiray dab nin kale shiday, maadaama colaad nin keeno ninna bakhtiin karo, raggu wuxuu ahaa hub raggu ku kala badbaado. In raggu kala badbaaddana, waxay ka dhignayad bulsho nabdoon. Sababta oo ah, haddii nolosha caadiga ah la eego, tan iyo tii horeba, haweenka ayaa ka shaqo badnaa ragga. Tusaaale ahaan, hoyga haween baa dhisi jiray, agabka guriga lagu dhiso inta badan iyo ka wax lagu cuno dumarkaa samayn jiray. Adhiga haween baa dhaqi jiray, cuntada haween baa samayn jiray, dhaanka la kaxeeyo wuxuu ahaa shaqo la wada qabto, geela iyo sahanka ayay raggu u badnaayeen, waliba way jiraan haween geel raaci jiray. Marka ay sidaas tahay, Soomaalidu haddii ay waxtarka qofka ku qiimayn lahayd, dumarka ayaa ka waxqabad badnaa ragga.

Waxa jirta dood tidhaahda: ninku gabadha wuu ka xoog waynaa, oo reerka ayuu difaaci jiray. Waa dhab in uu ninku gabadha ka xoog waynaa, laakiin, ninku gabadha ayuu ka xoog waynaa ee halista deegaanka ka jirta kama uu xoog waynayn. Sabab? Horta ninku gabadha ma la joogay? Sida dhaqanku ahaa, ninku wuxuu ahaa geeljire ama colaadjire, gabadhuna waxay ahayd adhiraac. Adhiga iyo geelu isku meel ma daaqaan, inta badanna xeryaha geelu meel ka fog aagga xaafaddu degto ayuu deggenaa. Sidaas kolka ay tahay, labo qof oo waaberiga midi inta uu shaax cabbo oo caano dhammo, oo uu waran, gaashaan iyo wayso biyo ah tuurta u rito geeliisa raaco; midina inta ay caano cabto oo xadhiga ama dhiisha ay tolayso ay xanbaarato, oo ay wayso biyo ah iyo dhengaddeeda qaadato adhigeeda raacda; miyayna labadaa qofi u sinnayn waxa uu mid walba kala kulmayo kaynta uu dhinaciisa ka galay? Inanka waranka sitay ee libaaxa ka hor yimi dila, miyuu ka geesisan yahay inanta dhengedda sidatay ee libaax ka hor kacay cunay? Wiilka geel jiraha ah ee waranka, gaashaanka, iyo toorrayda sita ee col soo weeraray iska

dhiciyay, miyuu ka geesisan yahay inanta adhiga la joogtay ee dhengedda sidatay ee geel jirahaasi kufsaday? Maya, wuu ka hubaysanaa! Ninku wuxuu mar walba diyaar u ahaa in uu wax dilo, in nin kale dilana wuu ka gaashaannaa, sida uu naftiisa iyo hantidiisa u difaacan lahaana, waxay ahayd dhaqan kolka uu dhasho lagu barbaariyo.

Kolkaa, colaaddu, waxay ahayd muraayad ninku raggannimadiisa ka daawado, si aanu u hungoobinna waa la qalabayn jiray, oo wax kaste oo uu qof ku dili lahaa waa la siin jiray. Gabadha se, la ma bari jirin hab ay isku difaacdo iyo hub ay wax iskaga celisaba. Sabab? Haweenka waxa loo arkaa hanti nin walba yeelan karo.

Raggu miyuu haweenka ilaalin jiray mise wuu isku ilaalin jiray? Dhaqankeenu waligii gabadh ma ilaalin, haweenka waxa loo adeegsan jiray nadaam maslaxo, waxa loo arkayay hab raggu ku kala badbaadi karo. Tusaale ahaan, marka lays dilo ee xinjiri daadato waa in xabna daato oo reeraha is laayey haween is dhaafsadaa! Gabadha la siiyay ninkii walaalkeed dilay walaalkii, miyaa la ilaaliyay mise waa laysku ilaaliyay? Inanta yar ee saddex iyo toban jirka ah ee la siiyay ninka afartan jirka ah ee laga qaatay geela—inta uu doono ha leekaado e—miyaa la iibsaday mise waa ilaaliyay? Inanta la siiyay ninkii kufsaday, miyaa la ilaaliyay mise waxa lagu ilaashaday wax "sharaf" lagu sheegay? Gabadha lagu furay in ay hablo badan dhashay maxaa lagu ilaaliyay? Eeg, raggu haweenka ma ilaaliyo, wuxuu ku ilaashadaa fullinta damaciisa. Xidhiidhka ka dhaxeeya aabbaha iyo inantiisa waa ku ganacsi, aabbuhu wuxu inantiisa u arkaa fursad uu dhaqaale ku samayn karo oo waxa uu siiyaa hadba ninka uu ka helli karo dhaqaale buuran, xitaa haddii aanu korin oo nolosheeda waxba ku darsan isaga ayaa siiya ninka uu rabo.

Xadhkaha dulmigu guriga ayay ku soohmaan, luuqada nacaybka iyo quudhsiga haweenku ka buuxo ee la caadiyeeyay guriga ayay ka bilaabmataa. Si aynu xadhkahaas u jarno, waa in aynu luuqadda ka dhiganaa af naagnimada muumuusa, oo aan naagaha u necbayn sida ragga qaar u neceb yahay. Hees carruureedkan, waxa aan ugu talagalay in ay barbilow u noqoto suugaan haweenka ku boorisa waxa ka duwan u adeegidda ragga.

HEESTA KOOWAAD:

Hobeeya hobeey hobeeya
Hibooy hadal barashadaadii
Hadaaqa kolkaad bilowday
Markaad hooyo iigu yeedhay
Haraadka waxaad ka biisay
Kashayda hamuum ku raagtay

Hobeeya hobeey hobeeya
Horseed kaahaay hobeeya
Hanaan wacaneey hobeeya
Hiraay cilmi lagu hagaago
Markaad hanatee dalkaaga
Hagtaa lagu haybiyaaye
Ha daynin aqoonta, hooyo

Hobeeya hobeey hobeeya
Allow hagardaamadeeda
Allow hadimooyinkeeda
Allow hawlaha adduunka
Huq iyo ciil yay ku mudanin!

HEESTA LABAAD:

Hobeeya hobeey hobeeya
Hiddaha guunkee ku hiifay
Halhaysyada layska qaatay
Intuu xume kuu hagoojay
Hacooyada beenahoodu
Garaadkooday hadleene
Ma tihid hilib iyo cad liita
Ma tihid haaf laga sarreeyo
Ma tihid fidmo halaagmo
Hoggaankiyo hogatuskeeda!

HEESTA SADDEXAAD:

Adaa hodanoo hormuuda
Adaa hoodiyo ayaana
Adaan halo baas ku goynin
Adaa dhaqankii horreeyay
Haweenka guhaadintiisa
Intii hagardaaminaysay
Huqdiisu ku gaadhin, hooyo.

HEESTA AFRAAD:

Eey hobeey hoobeey hobeey
Noo dhaloo nabad noogu dhalo

Oo dhammooy noo soo dhawoow
Dhawranee aan ku dhawranee
Oo dhammooy kugu dhaadannee
Noo dhammee farxad noo dhammee
Oo dhabta iyo dhinacayga imo
Aan dhalyahay ku dhooldhoolinnee.

HEESTA SHANAAD:

Waxaad habatiyo hankaaga
Aqoontiyo haybinteeda
Hawlaha ummada iyo dhulkaaga
Hareertaada iyo xilkaaga
Inaad hanataa habboone
Ha daynin ha quusan, hooyo.

AABBUHU UBADKIISA MA U HEESI KARAA?

DHAQANKEENNA AABBUHU WAA magacuyaal lagu abtirsado, waa maqane ama maqanejooge, kortinteenna iyo kabideennaba inta badan wuu ka maqan yahay. Waxba kama oga waayaha guriga uu inna la joogo, iyo bannaanka uu innooga maqan yahayba aynnu ku qabno. Hooyooyinku waxay dhahaan "aabbuhu waa geed sarrewaab." Geed sarrewaabku, waa marka geed aan laamo badan lahayn ama aan hadh fiican lahayn maro korka laga saaro si loo hadhsado, sida Maygaagga oo kale. Waxay uga jeedaan aabbuhu nolol dhisan oo aanu dhab ahaan waxa badan ka ogayn ayuu ku magacaaban yahay maamulkeeda. Ka maqnaanta uu aabbuhu nolosheenna ka maqan yahay waa dhaawac innagu maqan, sidaas darteed, waa in aabbaha iyo ilmaha laysku tolaa, maxaa yeelay, wixii ilmaha u dan ah ayaa waalidkana u dan ah.

Arxanka, xanaannaynta, tudhida iyo tudhaaluhu maaha shaqo hooyannimo ee waa sifaad dadnimado oo aadanaha ka dhaxeeya. Waa wax ay tahay in qof kaste yeesho—oo si gaar ah waalid kaste yeesho. Waxa aynu aabbannimada u naqaano waxay u baahan tahay dib u qeexid, sida hooyannimaduba ugu baahan tahay wax iska waydiin. Maxaa yeelay, waxa badan afartan jir xaarkiisa maydha oo saxarada ilmo labo jir ah ka qayliya—waa caqli foorrara.

Aabbuhu ma heesi karaa? Hagaag, sida ay hooyadu ugu heesto ubadka si la mid ah ayuu aabbuhuna ugu heesi karaa, kolka uu doonayo in uu xilka aabbannimada guto ee aanu magaca aabbannimada uun iska sidan. Heestani waa tusaalayn jidbixinaysa sida ay tahay in aabbuhu ilmaha ugu heeso.

Abbooy ya abbooy abbooyaa
Abbooy adhaxdiyo ludkayga
Abbooy uurkiyo boggayga
Ilwaadsiga laga abuuray
Ayaad tahay unugyadayda

Abbooy ya abbooy abbooyaa
Abbooy ifka cudud ku dhawrta
Aduunyadda wehel ku kaaba
In aan noqodo baan rabaaye
Ayaan badaneey ha wiiqan.

SUUGAAN KALGACAL

MAANSADA: KALGACALKU WAA DIIN

Kalgacalku waa diin
Dadnimada ku baaqdoo
Dugsi weeye lagu dhigo
Naxariista dunidoo,
Dabar weeye lagu xidho
Inta xumaha doontoo,
Daad weeye damin kara
Dab nacaybku shidayoo
Dihin weeye aan gudhin
Dayrta iyo xaggaagoo,
Damal weeye aadmiga
Qof dun wacan hadhsadoo
Maba dago danaystaha
Darajada adduunkiyo
Diinaarka caabuda!

Dildilaacii dunniyda iyo
Damdaguugan berigii
Qaraxii 'dam' yidhi baa
In ba dow ku darayoo

Ruuxdii dayowdee
Dani kala kaxaysaa
Lays la doonayaayoo
Dareenkiisu waa dhalad
Dad hortiiba jirayoo,
Kalgacalku waa dookh
Laga dayo asaaggaa!

Cudur maaha dili kara
Ruuxii dugsanayoo
Dabin maaha lagu rido
Dadka garashadoodoo
Derbi maaha celin kara
Tacabkiyo dadaalkoo
Kalgacalku waa dow
Dariiq nolosha loo maro!
Ma dulleeyo laabtuu
Dermadiisa dhigayoo
Damaqiisu waa hage
Duni kuu macneeyoo
Darsi weeye kuu dhiga
Sida laysu doorshoo,
Wuxu kuu dulmarayaa;
Dabcigiisa aadmiga!

Qof daloollo badanoo
Iintiisa dadayoo
Damqadoo qarsanayaa
Kalgacalka dayrshee
Kama daalo ruuxaan
Runtu diiqad galinayn!

MAANSADA: BOHOLYOW

Waa habeennadaydii
Soo hor joogsigaagiyo
Habsiintaada mooyee
Nafta hadalku mari jirin!

Waa markaan hamuumtiyo
Hilawgaaga awgii
Hebal iigu yeedhaay
Halhays aan ka dhigan jiray

Heedhe gacallahaygoow
Hanadkaan jeclaayoow
Hirashada dareenkoow
Nafta himiladeedoow
Hilbahayga maqanoow;
Qudha kuu hibeeyee
Haddaan hoo wadnaha idhi
In aad hanaqa go'ysaa
Ma hal naga dhaxaysaa?

Heedhe deeqahaygoow
Ina hooyo dahaboow
Dabcigaaga hodankaa
Haybaddaada yaabkaa
Heemaalka dhaladkaa
Iyo hadalka malabkaa
Qof bartaa ma hadhayee
Nafta kii hantoow hoo
Hayso abid ma ceeb baa?

Hanadkii burcaadoow
Curadkii halyaygoow
Hibo kay horaadkiyo
Haaneedka siisoow
Halgan kay u muhatee
Heesaha u tirisoow
Heedhe gacalahaygoow;
Hore waa tii loo yidhi
Hubsiimaa hal go'ysee
Horta caashaqeennii
Ma hareer qudhuu ahaa?

Ma adoon u heellanayn
Ayaan heello kuu tumay?
Ma annaa heshiiskii
Wacadkeenni haad baday?
Ma aduu hilawgii
Kaa hadhay kalgacalkii?
Siday hawshu nagu tahay

Maxaa soo hadoodilan!

Xididda i habayee
Halbawlaha waraabshow
Lafta dhabarka haysa iyo
Waaxyaha i hagayoow
Riyadii habeenka iyo
Hiigsiga dharaartoow
Waan kuu hanwaynee
Maxaad heedhe leedahay?

Hibadii farshaxanka iyo
Halabuurka quruxdoow
Harmuudkii da'daydoow
Waan kuu hanwaynee
Maxaad huunno leedahay?

MAANSADA: QOFBA SI

Suugaanta uma tirin
Si aan kuu waxyeelee
Waa muruqa laba suul
Qofba si u macneeyee
Nafta salowga haystaan
Ku sugaa boggeedoo
Waxay sahashigiisiyo
Siyar uga tag diidaan
Uga reebay sooyaal
Mayga siisanaysaa?

Waligay sir iyo caad
Been uma samaynoo
Ma saloollan aadmiga
Gob samaha ku caanana
Qaban mayso ee saar
Sadar maalin uma qorin!
Mayga siisannaysaa?

Haddii seban munaafaqa

Laygu sugay naf daacada
Haddaan suure iyo been
Ka sariigtay oo nacay
Ma anaa saf baas galay?
Ma adaa saluug jecel?
Keennee wax saarka leh!

Dumarkuba sabaalley
Qaarkood ku seexshaan
Ku sabaan raggoogoo
Intay been u soohaan
Sibiq uga dhammaystaan
Subaxday dan gaadhaan
Suurdhabaale ugu dare
Eray seef ka xoog badan
Mana falin sidoodaa!

Annigoo kun siri kara
Wacad laydhu sidatoo
Saldhigayn la geli kara
Anoo laabta boqol surin
Ka samaysan karayoo
Seejin kara ayaamaha

Waxa sooca kaa dhigay
Kuu siiyay caashaqa
Ma sareedo gaarood
Ragga kaga sarraysood
Sidataad u aragtaa?

Surcimaha wakhtiga iyo
Maalmaha sayaxa badan
Kama baxo e waan sidee
Ballantaynu sidignoo
Siganmaayo kaan rabo
Hadal aan sarbeebnayn
Markaan saani kuu idhi;
Ma saan aan dirgixinoo
Lagu socon karaayiyo
Daadkaa sabeeyee
Wax waliba sidaada iyo
Sacsac baad i mooddaa
Aad seed-dhanaanlayn!

MAANSADA: QAYAYAAB

Qalfoofta jidhkayga iyo
Abuurta Allaa qoroo
Annigu uma qeexi karo
Cidday la qaloocantoo
Wuxuu ku qiyaasayaa
Qofiba igu eegayaa
Siday quruxdiisu tee
Qofnimadiisa iyo dabciga
Miyaadan ku qaaddanayn
Qalbiga dadka kaa xigsaday?

Mugdaa qarin ee ha tagin
Naftaad qamarkeeda tahay
Inaan qirto oo ku dhaho
Qabkii diidaan qasbee
Qof dooxay wuxuu qarsaday
Qoontiisa intuu furfuray
Intuu qallin kuugu dhigay
Intuu tixo kuugu qoray
Waxaad qarribtee badnaa
'Ka qaado go'aan' ku yidhi

Inaad qancisuu rabee
Maxaa qayayaabka baday
Miyaad u qalmayn cishqiga?

Inaan qasab lagu helayn
Wadnaha qayb kaa go'diyo
Dareenka qubtee mar go'a
Qof kuu qiraysaan ahee,
Haddaan qufuloo xidhxidho
Haddaan u qodoo ku rido
Xabaal qar yar oo sibdhiyo
Jacaylkan qasaarahaa
Qudhaadu miyay mar tabi
'Ka quuso' waxaad i tidhi!

Qalbigaad goysaa ku yidhi;
Nin qaayo leh baad tahee
Qofaadan jeclayn ha barin
Qofnimadaaddii wacnayd!

HEESTA: AMARRE

Indhihiisa
Markan eego
Ee agtiisa
U dhaawdo,

Bishin oontay
Af basaasay
Markan aayar
Sida ayaad
La ilaasho
Ugu duugo
Idilkiiba,

Kal uduunka
Cuud ubaxa
Leh urtiisa
Marku aamus
In cabaar ah
Ugu jiifo,
Markan iihi
Iyo aaha
Xis abaaday

Ugu beerno
Dareen ooga,

Isla garadka
Nin ayaan leh
Naag ogaal leh
Sow aduunku
Uma hiisho!

HEESTA: MAAD BAAJISEEN

Boholyow dhaboo
Bogga kaa galoo
Baahida kalgacal
Ku baraa, walaal,

Kaa biinlahaa
Qabkan baarqabkiyo
Boqor kaa dhigoo,

Waxad baadhi layd
Ood bogan lahayd
Sida beer qudha iyo
Isu baahaniyo
Bashar loo yahoo,

Bilis aad kalgacal
La bilawdayoo
Barbaar aawadaa

Ugu baydhayoo

Bashar kugu jecel

Ballan aad la lahayd

Maad baajiseen!

HEESTA: RIYO

Riyo beena baan
Rubadiyo qalbiga
Ku rabaynayaa,

Ruux iga tagaan
Rogaal noqoshadii
Ka rajaynayaaa,

Dareen raagayoo
Runta diiday baan
U raxlaynayaa,

Roob aan da'ayn
Ayaan reero tagay
Naftan raallidaa
Uga reebayaa,

Raranka iyo dhibtii

Rafaadkaan maraan
Raxmad moodayaa,

Waayahan rigrigan
Qalbigaygan rogan
Sida awrka raran,

Waan ka raysanoo
Rabbi baan wanaag
Ka rajaynayaaa.

HEESTA: ALLAHAYOW MAXAA BERI

Anoon baahidaada iyo
Baylahdaada sheegayn
Basanbaaska waayaha
Bashar kale ogaynsiin,

Allahayow maxaan beri
Duco beerka hoosiyo
Bogga kaaga marin jiray,

Boqolaal habeenoo
Bila'aadam jiifsaday
Intaan kuu baroortaa
Beryi jiray ilaahay,

Inaad dunni badhaadhoo
Barwaaqowdo noloshana
Maxaan baafinteed waday.

HEESTA: KU AAMINAY

Ku aaminaye adigaa
Axdigeenni dumiyoo
Waxan uurka kaa jirin
Adigaa ku baaqoo,

Intaad igu adkaysood
Ila dhawr i tidhiyoon
Kuu uursamadaan
Adigii ku waayee,

Arji baan u qorayaa
Hadday ehelo leedoo
Ifka laga dacwoodee
Aynu eegno aayaha!

Intaan kuu samraayee
Beryo aragtidaa sugay
Intaan eray kalgacaloo
Iga dhaba ku odhan jiray,

Adba xeerin waydoo

Waxad eed kuu sheegtaa
Illintii wadnaha iyo
Oohintayadi aan qoray,

Aheey garashadaadii
Ruuxaad iilka gaysoo
Mallaa'iig u timiyoo
Ashahaado tidhi baad
Aamus kula dagaashaa!

HEESTA: CARRADAA ILAAHAY

Cawayskiyo baraartii
Ciyaaraha habeenkii
Caajis baan ka qaadaa,

Cag ma saaro meelaan
Carradaa Ilaahay
Ciidda ugu jeclaa beri,

Carruur baan ahaayoo
Caashaqa aday baray
Misna igu cidleeyee,

Ciilkiisa dabadaa
Ma calmado gayaankaan
Wakhti ciirsi bidi jiray,

Markaan caawimaad iyo

Kaa waayay cudud baan
Ragba caashaqood dhigay!

HEESTA: AXADDII HABAARNAYD

Axaddii habaarnayd
Ayaantii axdigu jabay
Ayaa lay horkeenaa
Markaan eego daymada,

Ubaxaan u sidi jiray
Iilkaan ku aasaan
Arkayaa intaasoo
Isna ololka igu shida,

Alle wuu ogaa suu
Intaa oga tag laayoo
Anna wuu ogaa saan
Intaa ula dhislaayoo
Kalgacalku eel buu
Uurkayga kaga tagay,

Indhadeeqahaygaan
Rag ka eeganaayoow
Adigiyo ayaankaa
Anba waan ku waayee!

HEESTA: KU HABBOONIDAA

Ruux kaa heloo
Had iyo jeer dareen
Hilow kuu qaboo
Hareertaada jecel
Ku habboonidaa,

Hadalkaaga wacan
Siduu hiil u yahay
Naf ku haystaa
Nimcadaa heshee
Qofkii kuu han weyn
Ku habboonidaa,

Wadne aad hantiday
Ku habboonidaa
Hedaad qayb dhan tahay

Ku habboonidaa
Hammuumtaa kalgacal
Ku habboonidaa,

Sidaan kaaga helay
Ku habboonidaa
Hamigayga qoys
Ku habboonidaa,

Igu hay boggoo
Nafta hoo macaan
Sidaan kaaga helay
Iigu heellanoow.

HEESTA: ISTAAHIL

CURADDA HOOYADAY KINSI Xuseen, oo ah Istaahil Daahir ayaan heestan u curiyay. Sabab? Istaahil, waa hooyaday labaad, waa curad lagu badhaadhay, waa gabadha iyada oo aad u da'yar, hooyaday oo toddoba iyo toban sanno uun ka weyn nala korisay, markii aabbahay sidii gabadh uu furay innooga tagay. Waxay ahayd—walina tahay—wehel adduun. Waxay indhaha ku furatay halganka hooyo da' yar oo rajo iyo agoon ahi ugu jirto korinta shan ubad ah oo ay curad u tahay. Waxay ku carruurnimo seegtay ciidaminta hooyo. Sagaal sanno ka hor ayay dalka ka baxaday, iyada oo qorshaheedu yahay darxumow ku nacay kuna daawan maayo!

Midii hooyaday
La halgamaysayee
Hawsha guriga iyo
Hayn iyo daryeel Ku hagaagtayeey
Istaahileey habboon,

Hagrashada wakhtiga
Hiil li' i danyare
Tii ka haajirtee
Hanfiga iyo dhibtii
Hallasii tahriib
Hedda aawaday
Halis galisayeey,

Hagaag tii u tidhi;
Hooyaday macaan
Nolol heersarre ah
Waa in ay heshaa
Ama hirarka iyo
Halaqyada baddu
Hilbahayga cune,

Halgamaa dhabaay
Garashada habboon
Hibo eebbahay
Middii uga heshaay
Istaahileey hormuud.

SUUGAAN NAF LAHADAL AH

MAANSADA: SADAR

Qof sidayda nabar
Saran oo damqaday
Sare kiciyay layl
Si yar kuma gam'ee
Waa saandanboo
Same ruux gogladay
Sardho wacan ku jiro,

Midh sigaara baan
Gacantayda sollan
Ee suufka leeg
Siduu daawo yahay
Suulkiyo fardhexo
Siman ugu hayaa,

Sacab diirran baan
Indho soo ligligan
Dhaban saanqabow
Ku salaaxayaa,
Sida lay hayay
Naftu saacad baas

Ii su'aallaysaa;

Sabigaa khiyaal
Lagu seexiyaa
Inta lagu sabee
Sodankii siddeed
Sanno iyo badh baa
Ina Seynabeey
Saaka kaaga hadhay,

Sidaan kuu ogahay
Inaad sii jirtanna
Hooyo samirle baa
Nafta siisatoo
Soomaali baad
Saxariir u tahay
Sebankaad jirtee
Ma saluugan bay
Ka samaynsantoo
Noloshaa sirgacan?

Ma anaa sirtay
Ku samaan lahayd
Layga saabayoo
Jahli baa silsilad
Sunna igu xidhxidhay?

Samada iyo cirkaa
Rabbi saaran baa

Silicaaga qoray
Kama siisto ruux
Sareedada adduun
Saamigii helee,
Ma illaaha sarraa
Samahayga neceb?

Garbahayga siman
Malag saaqidoo
Kor ka saaran baa
Same iyo shar qora
Kama siisto ruux
Suurado marshee
Ma sir daahan bay
Dadku saafayaan?

MAANSADA: DAMAQ

Damaq iyo xanuun baa
Naftaydii dilaayoo
Doogtii carruurnimo
Iyo nabar ka dabo yimi
Ayaa kala dabqaatoo
Diirkayga dhilayoo
Dubka hoose gubayoo
Sida dacas dhalaalee
Alle hay daweeyee
Ducaday ma gaadhaa?

Malaa'igta duushee
Dibnaha u adeegtee

Waxan doono qaadaay
Ma adaan durraansiga
Duddadaba la dhaafayn
Duni lagu cadaabiyo
Digniin loogu sii daro
Maxaa uga danleedihiin?
Nafta labada daarood
Mid uun mow ducduucdaan!

Hayskaba dayawdoo
Ha daallaadhaclaysee
Rajadeedda duugga ah
Dagdag ma ugu keentaan!

Allaheed ma diidine
Ma dabaylo xooglaa
Dalabkayga kaa quba?
Ma markaad la durugtee
Daruuraha la dhaaftaad
Ku dartaa wax ii darran?

Hadday diintu kuu tahay
Dastuur aadan dhaafayn
Dalool maqalku gaadho iyo
Indho aan wax kaa dadin
In uu daa'in leeyahay
Waa daliil ku suganee
Muxuu adiga kuu diray?
Ma dadkuu hilmaamaa
In ay dunidda joogeen?
Ma wax bay ka daahaan
Markay danaha leeyiin?

MAANSADA: HALGAN

Hawsheeda dunidiyo
Hirdankeeda waayaha
Ha ka quusan noloshee
Halgan baan ku leeyahay,

Haddaad hooyo waydoo
Aabbe kaa horreynoo
Walaal kuugu hadhinoo
Kaligaa HAN leedahay
halgan baan ku leeyahay,

Dadku haynta maalkuu
Hadyo goor sharfaayoo
Haybaddoodu qaar bay
Huga tahay la qaatoo
Markay kuu hagaagtaad
Hanadkooda tahayoo

Maalintay ku hiiftaad
Haacoo la noqotaa
Mid hunguri daraaddii
Heello kuugu tumayee
Ha ka yeellin garashada
Damac liita hagayee
Markay kaa hayaamaan
Cidla kugu hilmaamaan
Nafta how dulaynine
Halgan baan ku leeyahay,

Caqligaa hormuud iyo
Lagu yahay halyeyoo
Hadba suu u taliyaa
Lagu kala horreeyaa
Heerkeeda noloshoo
Hanti weeye maankuye
Ha ka dhigin ramuudkii
Marba ruuxu hayn jiray,

Hidde maaha noloshuye
Hadba waa halkeeda iyo
Ku habboonideedoo
Waxan maanta hayniyo
Halka aynu joognaa
Halxidhaale duunka iyo
Hiyiggeenna ugu filan
Marka lagu hagaajee
Ha ku daalin garashada
Beri hore wixii jiray!

SUUGAAN WADDANI AH

HEESTA: WADDANKAYGIIYOOW

Waxaan ahay dan yare
Waagii beryaba
Wuxuu quudanlaa
Ka werweraya (oo)
Waxtar kaa sugee
Waddankaygiiyoow

Waxaan ahay agoon
Walaal aan lahayn (oo)
Wehel aad u tee,
Waddankaygiiyoow

Waxaan ahay barbaar
Warba aan u hayn
Waxa dhacaya (oo)

Wacaal kaa rabee
Waddankaygiiyoow

Waxa na helay dhurwaa
Waxna quudan kara
Waxna qaadan kara
Wacyi aan lahayn
Waddankaygiiyoow

Webigiyo baddaha
Macdantaada wadhan
Intuu weynahay
Nimco kugu wanqalay
Waan ka oommannoo
Weehannaabayoo
Lagu wiirsayeey
Waddankaygiiyoow

Waddankaygiiyoow
Waaxyaha jidhkoow
Waxa iman ayaan
Waxmagaratadiyo
Waraabaha ku helay
Waddo kaa marshee
Ha werwerin dad baad
Wadnahooda tee!

MAANSADA: ISKA SIDO!

Sido heeryadoodoo
Bal hortaada soo eeg
Dhab u eeg hilbaha yaal
Haadda 'wiiw' leh sii dhugo
Hareeraha bal daymood
Hinbiriirso dhinacaa,
Hooyadaa waddada taal
Ubadkaa hareer yaal
Waxa dhigay habaaska
Hiyigaaga wayddii!

Madaxdeenna hodanka ah
Intaa hayb wadaagtaan
Waadiga u hiishee,
Sido haamahaagoo
Horta adigu yaa tahay?

Miyaad haysataa lacag?
Hoy qurxoon ma leedahay?

Boqol ha'yadood iyo
Mashaariic ma haysaa?
Huuteello waaweyn
Miyaad haaf ku leedahay
Hormuud qaybi kuu taal?
Waa adigaa u heellane
Miyuu heegan kuu yahay?
Ma hubsade bal soo joog!

Waxaan kaa horrayn iyo
Hungo looma yeedhoo
Qofay tiisu haysoo,
Hafrayaa ma fiicnee
Adigoon i hiifayn,
Hebal iyo warkiisiyo
Waxa heerka laga yidhi;
Hakiyoo dareenka iyo
Huqda aan wadaagniyo
Nolosheenna holacaiyo
Halasaha is celiya ah
Aynu kala habaynnee
Runta ma u hal tirinnaa?

Bal hagoogo garashada
U hoggaansan waa gare
Hodmiyoo garaadkana
Waxaan hoo ku leeyahay
Hadday kula hagaasaan
Ka haluulo waa dane,

Marka hore hal baan nahay
Hilbo wada dhashaa nahay
Hanniyaha wadnaha ee
Is hareero joogee,
Hadday kala hayaaman
Halistiisu badatee,
Hedda goyn karaan nahay,

Hadda anigu maan odhan;
Riyadii la haybshee
Inta beri la soo helay
Misna la la hayaamee
Hawsheedu badatee
Boqolaalka hadaf lee
Marba haybi sidataan
Heellada u tumayaa,

Waxaan haybiyaa taa
Mid ka heer sarraysoo
Nafta ila hadlaysaa
Sida haadka duushoo
Hagarli'i waxaan faray
Ku hagaagsanaatoo
Wuxuu yidhi hayankii;
Qof waliba halkiisuu
Ku gayaa in uu helo,
Nolol haybad iyo sharaf
Hoyga looga dhigayoo
Garashadu hagaysee
Yaan harawsigoodiyo
Hoosiiska reereed,
Kaa tuurin haadaan,

Ha ka yeelin qiirada
Runta lagu hareermaro
Waxba heeso ha u tirin
Halaqii ku dili lahaa
Haybtay wadaagaan
Ha la siinin aadmiga,

Waxba ha i huruufine
Hilbahaagan weydda ah
Sow hooyo caydhoo
Waayuhu ka hiisheen
Uma hurin nafteedii
Maxaa hodan is caashay
Heeryadiisa kugu raray?

Is ba hoojintaaduu
U hamuum qabaayoo
Hadda iyo horraysuu
Hilbahaaga wadhayoo
Markaad hoos u oyduu
Rejadiisu hoortaa
Wallee hiilka been baad
Ugu habi siyaasiga!

MAANSADA: SAAXIIB

MAANSADAN, WAXAN CURIYAY dhammaadkii dagaalkii Laascaanood ee laba kun iyo saddex iyo labaatankii, waxa aan markaas cindiga ku hayay in ay noqoto silsilad lagu dhaliilayo xukunkii faashilka ahaa ee Muuse Biixi. Ma se dhicin—saaxiibkay Shacraawi oo ka cudurdaartay awgeed.

Saaxiib boggayg iyo
Wadnahaad sudhnaydoo
Laabtaa ku sidatee,
Innagoon salaantiyo
Isla gaadhin sooryayn
Waynnu kala sadcaalee
Sidee tahay, ma nabad baa?

Sabenkii xumaadee
Kala saydhay dhallintee
Midba seer ku laalee
Sidii aad ogayd falay
Same kama filaayee
Sidee hawshu kugu tahay?

Sahwigii jacaylkiyo

Dareenkii ku sidan jiray
Wali muu ku sabayaa?
Ma suntii kalgacalkaad
Sidaydii shushubaysaa?
Siraheenna gaarka ah
Dadka yaanan siinine
Sabadii dadkeenniyo
Silicay ku noolyiin
Sababteeda maad garan?

Sabigiyo dhallaankii
Surimada la wadhayee
Dhiiggooda subaxdaa
Saraakiil ku faantee
Lagu siiyey billadaha
Caqligii sariigtaa,
Waa tuu salluugee
Siday xaajo moodeen
Sax miyuu u haystaa?

Ninka Sool u maqantahay
Boorama u sigan tahay
Wuxuu saaka leeyahay
Sidaad maqashay ii sheeg!

Saaxiib Shacraawoow
Ragga sahal ku iibsaday
Iimaanku waa sade
Waxay garasho siisteen
Sidaad maqashay ii sheeg!

Dhibta waan ka simanee
Ninka siray sideennaa
Yaryarkaa u sacab tumay
Aan wax kaa su'aalee
Horta sawracoodiyo
Sumaddoodu waa maxay?
Soomaalinimada iyo
Sinji maan wadaagnaa?

Saaxiib Shacraawoow;
Nin saqiir xabaaloo
Sabool xoolihii dhacay
Suugaanta loo tumay
Ee loogu sarekacay
Naftu way ka sirirtee
Halabuurku saw tuu
Dulmi suulin jirayee
Ha sarreeyo odhan jiray
Cadliga iyo sinaantuba
Ma sab baa la siistaa
Wixii loo saldhigi jiray
Nafta loo sadqayn jiray?


Visionary Press